

Abril 15, 2022

Ku socota: Shaqaalaha, Hay'adaha Maamulka Kiiska iyo Daryeel
Bixiyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada
Koriinka

Ujeedada: Isbeddelada heerka lacageed oo imaanaya Luulyo

Luulyo 1, 2022, heerarka lacageed ayaa isbeddeli doona ee loogu talagalay
Adeegyada Noloshaha La Taageero, Xirfadlaha Adeega Hab-dhaqanka,
Adeegyada Ilmo Korsiga ee Carruurta iyo gaadiidka dadweynaha (masaafada
la socdo). Fadlan fariintan si buuxda dib ugu eeg, si aad u diyaar garowdo.

Adeegyada Noloshaha La Taageero

Sanadkii 2020, Sharci-dejinta Oregon ayaa ODDS siisay maalgelin si ay u
hirliso heerka lacageed oo cusub ee loogu talagalay Adeegyada Noloshaha
La Taageero. Waxaan la shaqeynaynaa daryeel bixiyayaasha iyo
qandaraaslahayaga, Shaqaalaha Maamulka Caafimaadka (oo hore loogu
yaqaanay Burns and Associates), oo ku saabsan dejinta heerkani cusub.

Waxaan hadda la joogo falanqeynaynaa xogta ka socota daryeel bixiyayaasha
oo aanu ku soo ururinay daraasad dhanka kharashka ah oo la xiray Maarso
2022. Waad mahadsan tihiin, daryeel bixiyayaasha, taasi oo loogu talagalay
ka qayb qaadashada. Xogtani ayaa dadka ku wargelin doonta horumarinta
heerka lacageed oo cusub. Ma filayno in aan awoodno hirgelinta heerka
lacageed ee cusub ee Noloshaha La taageero marka la gaaro Luulyo 1, 2022.

Ilaa heerka lacageed uu diyaar u yahay in la hirgeliyo, ODDS waxay
qorshaynaysaa in ay isticmaasho maalgelinta la ansixiyay si loo hirgeliyo
korodhka heerka lacageed iyada oo lagu saleynayo qaabka heerka lacageed
ee Noloshaha La Taageero ee dhaqan galaya Luulyo 1, 2022. Taariikhdani:

- ODDS waxay hirgelin doontaa 30% oo ah korodhka heerka lacageed.
Korodhkani waxaa la filayaa in uu kor u qaado qiyaasida mushaharka

Xirfadlayaasha ah ee Taageerada Tooska ah (DSP) ee qaabka miisaaniyadda hadda oo uu noqdo \$17.57.

- Ka hadda la hirgeliyay ee 8.2% waxaa lagu dari doonaa kororka 30%, taasi oo ka dhigan kororka guud ee bilaabaya Luulyo 1, 2022, uu noqon doono 30%, ama aha 38.2%.

Qiyaasida mushaharkan ayaa waafaqsan heerarka lacageed ee cusub ee loogu talagalay adeegyada kale kaasi oo dhaqan galaya bisha Luulyo 2022.

ODDS waxay sii wadi doontaa in ay daryeel bixiyayaasha kala shaqeyso heerka lacageed ee cusub. Waxaaanu kula socodsiin doonaan macluumaadka ku saabsan horumarka aan sameynayno iyo wakhtiga loo qabtay hirgelinta.

Xirfadlaha Adeega Hab-dhaqanka iyo Adeegyada Ilmo Korsiga ee Carruurta

ODDS ayaa hirgelisay 8.2% oo ah korodhka heerka lacageed ee loogu talagalay Xirfadlaha Adeega Hab-dhaqanka iyo Adeegyada Ilmo Korsiga ee Carruurta iyada oo hirgelisay Luulyo 1, 2021. 8.2% kani waxaa ku jiray korodh ku meel gaar ah oo dhan 5% oo la isa siiyay intii lagu jiray xaalada caafimaad ee degdega ah ee bulshada ee COVID-19 iyo korodh dheeraad ah oo dhan 3.2% oo la isa siiyay iyada oo la adeegsanayo maalgelinta POP119.

Luulyo 1, 2022:

- Korodhka ku meel gaarka ah ee dhan 5% ee la xiriira COVID wuu joogsan doonaa.
- Korodhka ah 3.2% ee ka socda POP119 ayaa sii jiri doona.

Gaadiidka dadweynaha — masaafada la socdo

ODDS ayaa xaqiijisay kharashka masaafada la socdo ee loogu talagalay qaadista dadka ka tirsan bulshada **aanan** lagu darin heerarka lacageed ee cusub ee hay'ada Adeeg Bixiyaha ah ee dhaqan galaya Luulyo, 1, 2022. Dhammaan Hay'adaha Bixiya Daryeelka Guriga-dhexdiisa waxay awoodi doonaan in ay si gooni ah u diraan biilka masaafada la socdo 'mileage'.

Luulyo 1, 2022, heerka lacagta masaafada la socdo wuxuu kor ugu kici doonaa \$0.56/maylkii.

Agency with Choice iyo heerarka lacageed ee cusub ee loogu talagalay Adeegyada Guriga-dhexdiisa

ODDS iyo hawl wadaagayaasheena ayaa hadda dejinaya qaabka hay'ada guriga-dhexdiisa ee Agency with Choice iyo istiraatiijiyadiisa wax lagu hirgelinayo. Tani waxaa ku jira heerarka lacageed oo cusub oo loogu talagalay hay'ada bixisa adeegyada guriga-dhexdiisa. Waxaan rajeynayaa in aan bisha dambe kula soo socodsiiyo macluumaadka cusub oo ku saabsan horumarkani.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.